FSNAU
Food Security and Nutrition Analysis Unit-Somalia

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

La soo saaray
Bisha 4aad 23, 2012

## Saddex Biloodle Kooban - Saameyntii Xilligii *Jilaalka* (Janaayo-Maarso 2012)

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Colaada Sokeeye

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

FSNAU - Somalia

United Nations Somalia,
Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market,
Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146
/ 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

### Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

Xaalladda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya ayaa si wax-ku-ool ah u hagaagtay ama kobocday xilligii *Deyrta* 2011/12 marka la barbar dhigo *Deyrtii* 2010/11 oo macalluuli ku habsatay koonfurta Soomaaliya. Inta u dhexeysa muddada bilaha 4aad-6aad 2012, dad diradoodu dhan tahay 2.51 malyuun oo qof ayaa ku sugan xaalad cunta xumi/qalalaaso cunto ama xalaad gargaar/deg-deg ah sidii horeba loogu qeexay sanadkii hore (Janaayo 2012). Hayeeshee, tirada dadka ku sugnaa xaaladda gargaarka/deg-deg ah (IPC Phase 4) ayaa yaraatay sababta oo ah xaaladda sugnaanta cuntada bulshaweynta ama hab-nololeedka diilka/jiinka webiga Jubooyinka iyo Gedo oo fiicnaatay, kuwaas oo ku jirey xaalad gargaar deg-deg ah, haddana ku sugnaaday xaalad cunto xumi ah (IPC Phase 3) (Shaxda 1). Arrimaha sababta u ah koboca sugnaanta cuntada ee deegaanadan waxa ka mid ah fiicnaanta wax-soo-saarka galleyda ee la goostay Maarso-Abriil 2012 iyo kaluumeysiga ka socda *Dhesheekyada* Jubooyinka; iyo koboca fursadda iyo dekhliga tacab goosiga laga helayo beero-khudaarta iyo geed weynta (liinta, geed gaabka, iwm) ee Gedo. Qoysaska danyarta ah ee gobolka Gedo waxa kale oo yihiin kuwa ugu awood wax-iibsiga sareeyah (isweydaarsiga badarka iyo maalin goosiga) wadanka. Saadaalinta ah in roobab *Gu* dhexdhexaad ihi ka da'ayaan dhulka buuraleyda Itoobiya (Maarso-Juunyo 2012) waxay xaqiijineysaa in webiyada Shabeelle iyo Juba ay biyo keenaan taasi oo hagaajineysa hawlaha waraabka ee koonfurta Soomaaliya. Hawlaha waraabiku waxay u sahleysaa danyarta bulshada ku sugan diilga/jiinka webiyada fursado shaqo helid iyo dacbashada dalagyadooda xilligan *Gu'ga*. Xaaladda sugnaanta cunta ee qaybaha kale Soomaaliya wax isbedel ah kuma imanayo illaa dabayaaqada bisha 6aad 2012, si kasta oo uu roobabka *Gu'gu* noqodaan, kaasi oo saadaashu sheegeyso in uu ka hooseeyo sida caadiga ah. Tani waxay sababteedu tahay saameynta wax-ku-oolka ah ee xilligii *Deyrta* (bishii 10aad-11aad 2011) iyo gargaarka bani'aadaminimo ee ka socday koonfurta saddexdii bilood ee horeeyay sannadkan. Saameynta labadan qodob waxa laga karankaraa koboca oolitaanka ama ku qulqulka badarka suuqyada dalka; heysashada qoysaska beeraleyda danyarta ahi haystaan keyd badar ah; hoos u dhaca qiimaha badarka (galleyda iyo mesegada/hadhuudhka) iyo koboca awoodda wax-iibsiga; hoos u dhaca ku yimid kharashka ay galaan dadka suuqyada wax ka iibsada, taas oo inta badan bulshada Soomaaliyeed ay ka mid yihiin; inta badan xaaladda xooluhu waa kuwa dhaqan ama fiican; korodhka dhalintaanka ri'yaha/idaha iyo qiimaha xoolaha.

Hayeeshee, xilligii *Jilaalka* (Janaayo-Maarso 2012) aad ayuu ugu kululaa qaybo ka mid ah gobolada Waqooyiga (Deexda gobolka Bari, Hab-nololeedyada Sool, Nugaal, Buuraleyda/Guban and qaybo yar ee hab-nololeedka Hawd Togdheer iyo W. Galbeed), goobahaasi oo roobabkii *Deyrtu* (bilihii 10aad-12aad 2011) liiteen. Roobabka *Gu'gu* weli si fiican ugamay bilaaban goobahani. Sidaa awgeed, xaaladda xoolaha iyo daaquba ma fiicanna/way liitaan. Hay'adda Falaqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) waxay curusay hab lagu kormeerayo roobabka *Gu'ga* oo toban maalimoodle ah, taasi oo sahlaysa in la helo wakhti ku haboon hor-u-digida saameynta roobabka *Gu'ga* 2012 ee dhammaan hab-nololeedyada dalka Soomaaliya. Xogtii la soo ururiyey ee ku saabsaneyd xaaladda roobabkii da'ay 20 maalmood hore bisha Abriil waa ka mid warbixintan.

Tii oo la soo xiganayo xogta nafaqada ee laga helay goobaha caafimaadka, xaaladda nafaqada koonfurta Soomaaliya waxay muujinaysaa nafaqadu inay waxoogaa hagaagtay bishii 3aad marka la barbardhigo bishii 1aad 2012. Hayeeshee, xaaladda nafaqadu wali waxay ku sugan tahay mid halis ah ama daran, taasi oo inna tusaysa inay xaaladdu wax yar sare u kacday marka loo eego taxanaha nafaqo xilliyeedka. Astaamaha lagu karan karo nafaq xumida waxaa ka mid ah korodhka bugaan soctada iyo cudurada dilaacay (safmar). Hayeeshee, inta badan gobolada dhexe iyo waqooyigaba, xaaladda nafaqadu waxay tahay mid *Cakiran*, wax isbedelina ma dhicin laga soo bilaabo Janaayo 2012 (Eeg: Taxanaha Warbixin-Farsameedka Nafaqada, Maarso 9, 2012).

**Roobabka *Gu'gu* way ka bilaameen inta badan Koonfurta, halka ay wali qalalan yihiin deegaanada Xoola dhaqatada gobolada Dhexe iyo Waqooyi**

*Koonfur*: Sidii caadiga ahaa ayuu xilliga *Gu'gu* uga bilawday inta badan deegaanada Koonfurta, taas oo beenisay saadaashii hore[1] ee sheegaysay in xilliga *Gu'gu* dib u dhacayo. Hadda xaaladaha daaqa iyo biyaha waa dhexdhexaad ama way wanaagsan yihiin inta badan koonfurta Soomaaliya, hawlaha beerashada xilliga *Gu'gu*na way socotaa, sababta oo ah curashada xilliga *Gu'ga* iyo sahlanaanta xilligii *Jilaalka*. Hadda, qiyaas ahaan 78 boqolkiiba bulshada danyarta ah ee ku sugan hab-nololeedyada diilka/jiinka webiyada waxay haystaan keyd badar ah kaas oo dhammaan doona inta u dhexeysa bilaha 5aad illa 7aad 2012. Sidaas oo kale, 40 boqolkiiba qoysaska danyarta ah ee ku sugan hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada, kuna sii tiirsan wax beerashada, ee Baay, Shabeelooyinka, Gedo iyo Jubooyinka waxay haystaan keyd badar ah oo dhammaan doona bilaha 6aad -7aad. Hasayeeshee, qoysaska danyarta ah ee ku dhaqan hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada inta badanna ku tiirsan xoolaha ee gobolada Bakool, Hiiraan iyo Gedo way dhammeysteen keydkoodii badarka ama waa gabaabsi; way korodhay ku tiirsanaantooda wax-ka-iibsiga suuqa, kaalmo raadis iyo mucaanida gargaarka.

1 Ibid



*Gobolada Dhexe iyo Waqooyi*: Xilliga *Gu'gu* waa bilawday, halka roobkii dib u dhac ku yimid hab-nololeedyada Deexda iyo deegaanada caanka ku ah tacbashada digirta, inkastoo roobab shuux ah oo teelteel ahi ay ka da'een. Hasayeeshee, hab-nololeedyada xoolo dhaqatada ah ee Hawd iyo Caduun hadda waa qalayl. Inta badan deegaanada Waqooyigu waxay yihiin kuwo qalalan ooy ka mid yihiin dhul balaadhan oo ah hab-nololeedyada Sool iyo Dooxda Nugaal, kuwaas oo lagu sifeeyey inay ku sugan yihiin xalaad qalalaasa ah (IPC Phase 3) xilligii *Deyrta* 2011/12. Xaaladda daaqa iyo biyuhu wey liitaan inta badan deegaanada hab-nololeedyada gobolada dhexe iyo waqooyigaba. Xilligii *Jilaalka,* xaaladda xoolaha ee deegaanadii *Deyrtu* ku liidatay way ka sii dartay oo way xumaadeen. Hayeeshee, awoodda wax-iibsiga qoysaska danyarta ah ee gobolada dhexe iyo waqooyiba way xoogeysatay ama kobocday oo ay sababtay hoos u dhaca qiimaha firileyda (bariis) iyo korodhka qiimaha xoolaha (ri'yaha daabaxa ah), baahida loo qabo bisha Ramadaan (Juulaay-Ogoosto) awgeed.

Hoos u dhaca qiimaha badarka (firileyda) way socotaa taas oo faa'iido u ah bulshada ku tiirsan wax-ka-iibsiga suuqayada. Hadda, qiyaastii 70 boqolkiiba dadweynaha Soomaaliya, ooy ka mid yihiin dadka magaalooyinka, kuwa barakacayaasha, xoolo dhaqatada iyo qayb ka mid ah qoysaska bulshad danyarta ah ee deegaanada beero-xoolo dhaqatada iyo kuwa jiinka webiga, baahidooda firiley ama badar waxay ku xidhan tahay suuqayada, kaalmo raadis iyo gargaar bani'aadaminimo. Saddexda bilood ee hore ee 2012, hoos u dhaca qiimaha badarka ama firileyda way sii socotay inta badan suuqyada dalka. Gaar ahaan, hoos u dhaca qiimaha waafiga ah ama xooga ah waxa laga soo sheegay suuqyada koonfurta, sababta oo ah oolitaanka iyo qulqulka badarka ama firileyda, taas oo dhalisay wax-soo-saarkii wanaagsanaa ee *Deyrtii* iyo xilligii ka baxsanaa xilliga caadiga ah (*Deyrta* ka dib - Maarso 2012) iyo gargaarka bani'aadaminimo ee socota. Marka la barbar dhigo sanad ka hor, qiimaha badarka/firileyda dalka ee koonfurta Soomaaliya waxay hoos u dhaceen 50-60 boqolkiiba. Bishii Maarso 2012, qiimayaashu waxay ahaayeen kuwa ugu hooseeya muddo saddex sano ah gobolada caandka ku ah mesegada/hadhuudhka iyo Shabeellaha Hoose. Hayeeshee, qiimaha mesegada ee suuqyada gobolada dhexe wax yar ayay korodhay saddexdii bilood ee hore sanandkan colaadda ka jirta goboladaas awgeed oo khalkhal gelisay dhaqdhaqaaqii ganacsiga. Is-weydaarsiga badarka iyo mushqaayadda tacab goosiga ama ri'yaha dabaaxa ah waa wax wanaagsan ama lagu farxo dalka oo dhan; aadna uu uga sareeyaa intii uu ahaa wakhtigan oo kale sannad ka hor.

Taxanaha qiimaha badarka/firileyda ee bilaha soo socoda waxa saameyn xoogle ku yeelan doona wax-soo-saarka *Gu'ga* iyo qulqulka ama socoshada cuntada mucaawinada ah. In kastoo colaadu ay aad u xuntahay dagaaladuna wali ka soconayaa gobolada dhexe iyo koonfurtaba, haddana deegaanno badan ayaa noqday kuwo ay ka shaqeyn karaan hawlwadeenada gargaarka ee gobolada Hiiraan, Baay, Gedo, Bakool iyo qaybo ka tirsan Jubooyinka iyo Galgaduud.

**Xaaladda nafaqada ee Koonfurta ayaa si weyn u hagaatay laga soo bilaabo bilaha 7aad-8aad 2011, laakiin waxay ku sugan yihiin *Xaalad Daran*.**

Xaaladda nafaqada ee koonfurta Soomaaliya way ***Daran*** tahay tiyoo lagu salaynayo taxana xilliyeedka xogta ama macluumaadka nafaqada laga helayo adeegyada caafimaadka iyo xogta cudurada safmarka ah ee ay soo saartay Ururka Caafimaaka Aduunka (WHO). Macluumadka/xogta nafaqada gobolada Jubooyinka, Baay iyo Bakool ee muddadii Janaayo-Maarso 2012, waxay muujinaysaa inay qayb badan (15 boqolkiiba iyo ka badan) ee caruurta soo booqanaya goobaha caafimaadka ay yihiin qaar nafaqo-daro ba'an hayso. Hayeeshee, xogta adeegyada caafimaadka ee dadweynaha ku sugan magaalooyinka Shabeellooyinka iyo Moqadisho waxay inna tusaysaa in nafaqada darada caruurta soo booqanaya goobaha caafimaadka ay ka heer hooseeyaan (10-15%) isla muddadaa. Sida laga soo xigtay warbixinta Caafimaadka Gurmadka Deg-deg ah ee Soomaaliya ee Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO), waxa jira bugaan socod sare oo la xidhiidha cudurka duumada ama malaariyada ee gobolada Jubada Hoose, Gedo, Shabeelaha Hoose iyo Banaadir iyo shuban biyood ka dilaacay iyo wax daacuun loo maleynayo ee gobolada Shabeelaha Dhexe, Jubada Dhexe iyo Gedo. Waxa la filayaa in xilliga *Gu'ga* (Abriil-Juunyo) ay badato tirada dhacdooyinka shuban biyoodka ee Soomaaliya sida ay sheegayso taxanaha taariikhdu. Helitaanka cuntada ee heer qoys waxay ahaanaysaa mid leh iska caabin xilliga *Gu'ga* marka keydka qoysaska danyarta ahi yaraado, colaaduna ay dhibaatayso hawlaha gargaarka bani'aadamanimo, roobabka *Gu'ga* oo la filayo inay ka hooseeyaan sidii caadiga ahayd sida ay saadaashu sheegayso. Hayeeshee, inta badan gobolada dhexe iyo waqooyiga, xaaladda nafaqadu waxay ahaanaysaa mid Qasan, isbedelna aan sameyn illaa Janaayo 2012 (Eeg: Taxanaha Warbin-Farsamadeedka Nafaqada, Maarso 9, 2012)


**Shaxda 1: Isbeddellada tiro koobka dadka ee wajiyada IPC ee Diil-webi Juba iyo Gedo (2012)**

| | | Jan - Mar 2012 Qayabinta | | Apr - Jun 2012 Qayabinta |
|---|---|---|---|---|
| **Gobol** | **Degmo** | **Qalabase** | **Gargaar Deg-deg** | **Wadarta dadka ku fira Qalalaase** |
| Gedo | Baardheere | 5,000 | 6,000 | 11,000 |
| | Belet Xaawo | 1,000 | 1,000 | 2,000 |
| | Doolow | 1,000 | 1,000 | 2,000 |
| | Luuq | 2,000 | 3,000 | 5,000 |
| **Sugeyn** | | **9,000** | **11,000** | **20,000** |
| Jubada Dhexe | Bu'aale | 7,000 | 14,000 | 21,000 |
| | Jilib | 10,000 | 20,000 | 30,000 |
| | Saakow/Salagle | 4,000 | 10,000 | 14,000 |
| **Sugeyn** | | **21,000** | **44,000** | **65,000** |
| Jubada Hoose | Kismaayo | 3,000 | 6,000 | 9,000 |
| | Jamaame | 13,000 | 27,000 | 40,000 |
| **Sugeyn** | | **16,000** | **33,000** | **49,000** |

# WARBIXINTA QAYBAHA


## CIMILADA

**Khariiradadda 1: NOAA CPC Saadaasha Roobabka ee 7 maalmood ee soo socoda (wuxuu shaqaynayaa ilaa iyo 30ka Bisha 4aad 2012)**




Xigtau: Maamulka Cimilada Qaranka

**Khariiradadda 2: JDDJ Jaantuska kala Duwanaanshaha Daaqa la Joogteeyay CMD ee Tobanlihii koowaad (1-10 Bisha 4aad, 2012)**




Xigtau: Xaruta ururinta Macluumaadka Dayaxgacmeedka

**WARBIXINTA QAYBAHA**

***Saamaynta Roobabka***

Xilligii *Jiilaalka* ee 2012 (Bishii 1aad-3aad) ayaa aad u adkaa habnololeedyada Oogada Sool, Dooxada Nugaal, iyo Buuralleyda Goliska ee waqooyiga oo xilligii *Deyrta* uu xumaa. Xoolo-dhaqatada Hawdka iyo Deexda xeebaha ayay sidoo kale u saameeyeen xaaladdii roob la'aanta ee ku ragaaday (tan iyo Bishii 11aad 2011). Meelahan, ilihii daaqa iyo biyaha oo dhammaaday iyo xoolihii intoodii badnayd ka hayaamay (xilligii *Deyrtii* dhawayd) ayaa sii xumaysay xaaladda. Taa lidkeed, xilliga diraacda ayaa qaboobaa dalka Soomaaliya intiisa kale, oo ka faa'iiday roobabkii laxaadka lahaa ee *Deyrta*. Heer biyoodka webiyada Juba Iyo Shabeelle ayaa hadda lagu warbixinayaa inay hooseeyaan, balse ay u badan tahay inay kordhaan maalmahan soo socda uguna wacan tahay roobabka lixaadka leh ee ka da'aya buuraleyda Itoobitya.

Roobabkii Xayska (Bishii 1aad-2aad) 2012 oo ah roobka kaliya ee ay helaan habnololeedka Gubanka3 ayaa ahaa kuwo teelteel ah oo waxtarkoodu liito. Waxaa kaloo lagu soo warbixiyay in waddanka gebi ahaantii aanu helin roobabkii Todobka4 (dabayaaqadii Bishii 3aad). Waxaa taa ka duwan, intii u dhexeysay dabayaaqadii bishii 3aad iyo tobakii hore ee bisha 4aad, roobab dhexdhexaad ah oo si caadiga ah u baahsan ayaa ka da'ay dhulka intiisa badan ee gobollada Awdal iyo Waqooyi Galbeed. Isla muddadaasi, maalmo dhawr ah ayay roobab u dhexeeya shuux iyo dhexdhexaad oo goosgoos ah ka da'een buurallayda Golis (Sanaag iyo Bari), qaybo ka mid ah Oogada Sool (Sanaag), meelo kooban oo ka mid ah gobollada Jubbooyinka, Gedo, Baay iyo Bakool. Xogta ka imanaysa gudaha dalka ee tobankii dhexe ee Bisha 4aad ayaa muujinaysa in roobab u dhexeeya shuux iyo dhexdhexaad ay ka da'een dhammaan gobollada koonfurta. Waqooyi Galbeed, roobab dhexdhexaad ah ayay heleen meelo ka mid ah Hawdka, Nugaasha iyo Oogada Sool, halka waxtarka roobka uu ahaa mid dhexdhexaad ah Awdal iyo W. Galbeed. Gobollada Dhexe iyo Waqooyi Bari ayaa lagu soo warbixiyay inay ka da'een roobab shuux ah.

Marka la eego saadaashii la soo saaray Bishii 3aad 2012, oo lahayd inay isasoo tarayso in roobabka *Gu'ga* oo ka hooseyn doono caadiga (60-85% sida caadiga ah) roobabka *Gu'gana* ay dib uga dhici doonaan xilligoodii; qaybsanaantiisuna noqon doontaa goosgoos (teelteel) dhammaan Soomaliya. Hase ahaatee, sida laga soo xigtay US NOAA oo Hawlaha Cimilada Qaranka (HCQ) ah, saadaasha hawada ee toddobaadlaha (hirgalaya ilaa 30ka Bisha 4aad, 2012) ee Geeska Afrika, ayaa la filayaa in roobaka di'i doona ay kordhi doonaan (40-150mm) dhulka intiisa badan ee Waqooyi Galbeed, Badhtamaha (Galgaduud Iyo qaybo ka mid ah Mudug) iyo gobollada koonfurta ee Hiraan, Baay, Bakool, Gedo, Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka (Khariidadda1).

***Xaaladda Daaqa***

Jaantuska kala Duwanaanshaha Daaqa la Joogteeyay (JDDJ) ee dayax-gacmeedku soo minguuriyay tobanlihii koowaad ee Bisha 4aad 2012 ayaa muujinaya xaaladda daaqa ee dalk intiisa badan oo dhexdhexaad ah (Khariidadda 2). Waxaa taa ka duwan meel-meel ka mid ah buurah Goliska ee Waqooyiga, Bay, Bakool, Gedo iyo inta badan gobollada Jubooyinka halkaasoo uu muujinayo in sida badan ay wax yar nusqaameen JDDJ marka la barbar dhigo Celceliska Muddada Dheer (CMD). Xaaladda daaqa oo aad u xun ayuu ka muujinayaa qaybo la mid ah xoolo-dhaqata iyo beer-xoolo dhaqatada degmooyinka Afmadow, Kismaayo iyo Badhaadhe ee gobolka Jubada Hoose, halkaasoo JDDJ-ga uu muujinayo meel u dhexeysa hoos u dhac yar ilaa mid weyn marka la barbardhigo CMD.

3 Guban waa habnololeedka Xeebta ee waqooyiga Soomaaliya ee Gacanka Cadmeed ku teedsan
4 Todob waa roobaka ka da'a dhulka intiisa badan ee Soomaaliya tobanlaha u dambeeya ee Bisha 3aad
5 IGAD Golaha Saadaasha Cimillada iyo Dhaqangalka ayaa bahisay saadaashii roobabka Guga Bishii 2aad 2012. Sadaasha Bisha 3aad ee roobabka Guga 2012 waxaa soosaary Macadka Cilmibaadhista Caalamiga ee Cimilada iyo Bulshada. Saadaashani ayaa iyana ayaa lagu cayimay Warbixinta Kooban ee ee Bariga Afrika (3dii Bishii 4aa, 2012)


# COLAADAHA SOKEEYE

Saddexdii bilood ee hore ee sanadkan, dagaallada sokeeye ee gobollada Koonfurta iyo Bartamaha ayaa ahaa saamaynta ugu daran ee sababtay barakac aad u baahsan; carqalado dhanka hab-nololeedyada iyo hawlaha dhaqaalaha; kala jab ku yimi isu socodka badeecadaha iyo ganacsiga; iyo xannibaadyo dhanka kaalmada bani'aadminimo. Gobollada Jubbooyinka, Gedo, Baay, Bakool, Galgaduud iyo Hiiraan ayay aad u saameysay colaadaha ka dhex oogan Dowladda Ku-meel-gaarka (TFG) iyo maleeshiyooyinka mucaarka ku ah. Inta u dhaxaysay bilihii 2aad iyo 3aad, dagaallo ba'an ayaa waxa ay ka dhex dhaceen kooxaha is haya duleedka magaalada Muqdisho illaa iyo dhulka ku sii fidsan Ceelasha Biyaha (Afgooye). Inkastoo ay xaaladda nabadgelyo ee Muqdhisho ay soo hagaagaysay (ilaa bishii 8aad ee 2011), shaqaaqooyin nabad gelyo dari ah oo soo noq-noqanaya ayaa ah dhibaaooyin taagan. Waxa jira warar sheegaya inay jiraan miinooyin dhulka lagu aasay, qaraxyo is-miidaamin, adeegsiga banbo gacmeedyo iyo iska-hor-imaadyo goos goos ah (oo u dhexeeya ciidamo ka tirsan dowllada ku-meel-gaarka dhexdooda ama dowllada ku-meel-gaarka iyo Al-Shabaab). Ka dib dagaallo aad u ba'an oo dhacay bilihii 2aad iyo 3aad oo u dhexeeya dowladda ku-meel-gaarka iyo xulufadeeda ayaa qabsaday magaalooyin ay ka talinayeen Al-Shabaab sida Baydhaba, Xuddur, Maxaas iyo Ceelbuur. Dhanka gobollada Waqooyi, colaado ayaa laga soo sheegayaa kuwaasoo u dhexeeya dowladda Soomaalilaan iyo maleeshiyooyin taageeraya maamul-goboleedka Khaatumo ee lagaga dhawaaqay gobollada Sool iyo Togdheer. Dagaalladan ayaa si xoog lehi ay uga jireen magaalada Buuhoodle (Toghdeer) iyo Kalabaydhoo ka tirsan Laas-Caanood (Sool). Hase yeeshee, lama soo sheegin wax hirdan la xiriira ka manaafacaadsiga daaqa iyo biyaha ee dhulka miyiga xilligan warbixinta la qorayay.

**Saamaynta Tooska ah iyo Midda Dadban**

Tirada guud ee barakaca ee 3da bilood ee hore ee sanadkan ayaa ah 139,000 oo qof sida laga soo xigtay Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR). Khaas ahaan, bishii labaad ee sanadka ayaa tirada barakacday ay gaartay in ku dhow laban lab (66,000) tirooyinkii bishii 1aad (36,000) iyo bishii 3aad (37,000). Tani ayaa inta badan loo aaneynayaa colaadaha sokeeye (eeg Jaantuska 1aad). Xogihii ugu dambeeyey ee Hay'adda Qaxootiga (UNHCR) iyo Hay'adda Falanqaynta Sugnaanta Cunnada iyo Nafaqada (FSNAU) ayaa muujinaya barakac aad u ballaaran oo ka dhacay ceelasha biyaha iyo weliba gobollada kale ee ay colaadahu ka jiraan, ayadoo ay dadku u qaxeen dhanka Muqdisho. Xogihii bishii 3aad ee FSNAU ayaa muujiyay in dagaallada ka huraya duleedka magaalada Muqdisho ay sababeen kala go' ku yimid isu socodkii badeecooyinka taasoo saamaysay soo gelinta magaalada Muqdisho noocyada cunnada ee maxalliga sida firlayda dalka laga beero, caanaha, hilibka iyo kudradda uga iman jirtay gobollada Shabeellooyinka. Taa waxaa sii dheer in baandoow maalinle ah (7am ilaa 11.30am) lagu soo rogay magaalada Beledweyne ilaa iyo bishii 2aad uu si aad ah u saameeyey hawlaha ganacsiga, fursadaha dakhli dhalinta iyo hawlihii caafimaadka iyo dugsiyada ee dadka reer-magaalka ah. Qaybo ka mid ah gobollada ay colaaduhu halakeeyeen (Jubbooyinka, Gedo, Galgaduud, iwm.), shaqaaqooyinka jira ayaa waxay xannibeen ka faa'ideysiga manaafacaadka deegaanka (daaqa iyo biyaha), ayagoo carqaladeeyey isu-socodka maciishadaha ee dadka magaalooyinka iyo miyigaba. Mamnuucidda hawlaha samafal ee inta badan gobollada koonfurta iyo kuwa dhexe ee ay gacanta ku hayaan xoogagga wax iska-caabbinta ayaa weli taagan, taasoo u diidaysa dadka dhibaataysan inay toos u helaan gargaarka bani'aadminimo. Hawlo samafal ayaa hataan ka socda gobollada waqooyiga, qaybo ka mid ah gobollada koonfurta (sida Banaadir, inta badan Gedo, Badhaadhe iyo Kismaayo (Jubbada) iyo gobollada Dhexe (Galgaduud iyo Mudug). Colaadaha ayaa u muuqda inay sii socon doonaan oo weliba ay ka sii dari doonaan bilaha soo socda ayadoo si aad ah loo odorasayo inay dhici doonto dhibaato naf iyo maalba leh, barakac iyo carqalado ku yimaada hab-nololeedyada iyo dhaqaalahaba.

**Jaantuska 1: Dhaqdhaqaaqa Dadka (Bilaha 1aad-3aad 2012)**




# BEERAHA

Intii u dhexeysay dabayaaqadii bishii 3aad iyo horaantii bishii 4aad 2012, Hay'adda Falaqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) waxay sameysay daraasad kooban oo lagu qiyaasayso wax-soo-saarka dalaggii la tacbaday ka dib *Deyrtii* (xilliga ka baxsan xilliga caadiga ah) iyo in la soo hubiyo sida loogu diyaar garoobay xilliga *Gu'ga* 2012 sida dhul diyaarinta, dalag abuurka, waraabinta, kelli qodista, iwm. Natiijadii daraasaddu waxay sheegtay in la goostay dhul dhan 29,500 hiktar oo ah galley, sisin iyo digir oo ku yaal deegaanada diilka/jiinka webiga Jubada Hoose, Jubada Dhexe, Gedo iyo Shabeelaha Hoose iyo deegaanada ama habnololeedka sida xooga ah loogu tacbo mesegada ee Baay. Wax-soo-saarka dalagyada ee la tacbadey ka dib xilligii Deyrtii ee heer gobol waxa lagu soo koobay shaxda hoos ku xusan (Shaxda 2)

**Shaxda 2: Qiyaasta Wax-Soo-Saarka Dalagyada Xilliggii *Deyr* 2011/12 ka dib**


| | Wax-Soo-Saarka Dalagyada Xilliggii *Deyr* 2011/12 ka dib ee Bisha Maarso (Mt) | | |
|---|---|---|---|
| Gobollo | Galley | Sisin | Digir |
| Gedo | 500 | - | - |
| Jubada Dhexe | 3,200 | 1,940 | 260 |
| Jubada Hoose | 6,700 | 1,600 | 310 |
| Shabeelada Hoose | 450 | 900 | - |
| Baay | 680 | 200 | - |
| Isugeyn | 11,530 | 4,640 | 570 |

Qiyaasta dhulka laga goostay galleyda ee degmooyinka Buu'aale iyo Saakow (Jubada Dhexe) iyo Kurtunwaarey (Shabeelaha Hoose) way ka yar tahay intii hore loo qiyaasey xilliggii *Deyrta* ka dib, taas ooy sababtay waxyeello cayayaan (dhuun qabad, kabajaa, malabiso, iwm.) iyo haraad uu keenay heer kul sare. Si kastaba ha ahaatee, wax-soo-saark guud ee galleyda ee gobolada koonfureed ee la tacbay ka dib *Deyrtii* la soo dhaafay waa labalaabka qiyaastii la odorosay ama saadaaliyey xilligii *Deyrtii* la soo dhaafay. Tan waxa keentay baaxadda dhulka lagu tacbay galleyda ee degmada Jilib (Jubada Dhexe) iyo degmada Jammaame (Jubada Hoose) oo aad u korodhay; degmooyinkaas oo leh biyo qabatin bada oo wax laga beerto (*Dhesheekyo*) (footnote 6). Wax-soo-saarka galleyda ee labadan degmo waa 68 boqolkiiba wax-soo-saarka guud ee galleyda ee la tacbay ka xilliga *Deyrta* ka baxsan. Wax-soo-saarka sisinta ee la tacbay ka dib *Deryta* waxay ka yar tahay 28 boqolkiiba qiyaastii la saadaaliyey sababta oo ah korodhka baaxadda dhulka lagu tacbay galleyda, gaar ahaan qaybo ka mid ah gobolada Juboyinka.




*Hawlaha Waraabka Socda. Tuulada Bananey, Jowhar, Shabeellada Dhexe, FSNAU Bisha 4aad 2012.*

**Jaantuska 2: Taxana Goboleedka Qiimaha Galleyda (Juba and Shabelle)**




**Jaantuska 3: Taxana Goboleedka Qiimaha Mesegada (Baay, Hiiraan, Bakool, Gedo)**




Hawlaha beeraha sida goynta, tomidda/finjilka iyo daldalka/rarka badarkii soo go'ay ee dalagyadii la tacbay ka dib *Deyrtii* ee aakhirkii bishii Maarso iyo horaantii bisha Abriil iyo hawlaha xilligan *Gu'ga* (sida dhul diyaarinta, abuuridda, waraabka, hagaajinta/tayactirka kelliyada, iwm) waxay u sahashay ama abuurtay qosaska danyarta ah fursado shaqo siiba gobolada Koonfurta iyo Waqooyi Galbeed. Tani waxay dhalisay korodhka heerka tacb goosiga ee deegaanada hawlaha ka socdaan.

Waa kobcay oolitaanka ama helitaanka badarka inta badan suuqyada dalka; taas oo ay sababtay wax-soo-saarkii wanaagsanaa ee xilligii *Deyrta* 2011/12 iyo kan soo go'ay ka dib *Deyrta* iyo waliba kaalmada bani'aadminimo ee ka socota gobolada koonfureed. Arrimahani waxay sababeen hoos u dhaca qiimaha badarka dalka ka soo go'a in uu sii jiro ama socdo intii u dhexeysay bilaha 1aad iyo 3aad. Waxaa hoos u dhacay celceliska qiimaha galleyda ee suuqyada ku teedsan diilka/jiinka webiga ee Shabeelooyinka (5-15%) iyo Jubooyinka (20-40%) (Jaantuska 2). Sidoo kale, laga soo bilaabo bishii 12aad ee 2011, waxa hoos u dhacay qiimaha mesegada/hadhuudhka ee Baay (65%), Bakool (45%), Hiiraan (39%), Gedo (33%) (Jaantuska 3), Gobolada Waqooyi Bari (24%) iyo gobollada Waqooyi Galbeed (19%). Hayeeshee, qiimo korodh mesegada ah (4%) ayaa laga soo sheegay gobolada dhexe taas oo ay sababtay xanibaad ku timid ganacsiga colaadda hubeysan awgeed. Isbarbar dhiga bishii 3aad 2011 iyo bishii 3aad 2012 waxay muujisay hoos u dhac weyn ee qiimaha badarka (galley iyo mesego/hadhuudh)) ee gobolada koonfureed: Shabeelooyinka (45-65%), Jubooyinka (28-40%) iyo deegaanada ku caanka ah mesegada (58-76%). Isla muddadan oo kale, si ladifan ayaa qiimaha mesegadu hoos ugu dhacay gobolada dhexe (15%), waxaan buureyna kor ugu kacday gobolada Waqooyiga Galbeed (4%), halka aan wax isbedel ah laga soo sheegin gobolada Waqooyi Bari

Bishii 3aad 2012, qiimihii galleyda ee ugu hooseeyey waxa laga diiwaangeliyey degmooyinka caanka ku ah wax-soo-saarka galleyda ee Qoryooley, Marka iyo Afgooye ee Shabeelaha Hoose (4,500 - 6,500SoSh kiiladiiba - 40-55% boqolkiiba qiimaha galleyda ee bishii 3aad 2011), halka qiimaha galleyda ee ugu sareeya laga soo sheegay Afmadow iyo Dhoobley ee gobolka Jubada Hoose (11,000-12,000SoSh kiiladiiba - 70-80% boqokiiba qiimaha galleyda ee bishii 3aad 2011). Qiima sareynta ee Jubada Hoose waxa ugu wacan degmooyinka oo aad uga fog ama durugsan deegaanada wax-soo-saarka leh iyo hoos u dhac ku yimi dhaqdhaqaaqa ganacsi colaadda hubeysan ee ka jirta gobolada Jubooyinka. Qiimaha ugu sareeya ee mesegada/hadhuudhka waxa laga soo sheegay degmada Aadan Yabaal ee gobolka Shabeelaha Dhexe (30,000SoSh kiiladiiba - 188% boqolkiiba qiimihii mesesagada ee bishii 3aad 2011) taas oo ay sabab u tahay wax-soo-saarka badarka oo aad u liitay dhawr xilli oo is-xigay, dhaqdhaqaaqa ganacsiga oo aad u yaraadey colaadda awgeed iyo yaraanta ama la'aanta gargaarka bani'aadaminimo.

---

6 Tacbashada biyo qabatinnada waa nooc ka midda ah beer falashada xilliga ka baxsan xilliga caadiga ah; taas oo ka dhacda goobaha ay daadadku ku soo rogmadaan (*Dhesheyada*) oo ah markay biyuhu ka gudhaan ama dib webiga ugu noqdaan. Waxa laga faa'ideysanayaa rayska ku hadhay carada.

# Xoolaha

### Daaqa, Biyaha iyo Hayaanka Xoolaha

Helitaanka cawska, caleenta iyo biyuhuba aad bay u sii xumaadeen qeybo ka mid ah Gobollada Waqooyi sababa la xiriira roobkii Xeyska oo baaqday iyo dib u dhac ku yimid roobka *Gu'ga* 2012. Arrintani waxay si gaar ah u khuseysaa meelahii roobkii xilligii *Deyrta* ee bilihii Oktoober iyo Noofember ay ahaanyeen kuwa liita oo ka hooseeya heerka dhexdhexaadka ah, ayna ka mid yihiin dhul habnololeedka Deexda ee gobolka Bari, oogada Sool, Dooxada Nugaal, Goliska ee Sanaag iyo xeebaha Awdal (Guban) iyo baro kooban oo ah habnololeedka Hawd ee gobollada Waqooyi Galbeed iyo Togdheer. Xogta laga helayo deegaanada waxay xaqiijinaysaa in biyo-dhaankii ka bilowday bishii Febraayo 2012 dhulka miyiga ah ee gobolada Sool, Sanaag iyo Bari ay wel socoto, ayna sababtay in qiimaha labaatanka galaan oo biyaha ahi ka sareen 20-30 boqolkiiba marka la barbar dhigo heerkii aay joogeen bishii Diisember 2011. Qaybo badan oo ka ka mid ah gobolada dhexe iyo kuwa koonfureed, cawska, caleenta qalalan iyo biyaba ay jireen, Xilliga *jiilaalkuna* waa fududaa/ladifnaa. Arrintu si kastaba ha ahaa, biyo dhaan goor hore bilaawday ayaa laga soo sheegay baro kooban ee hab nololeedyada Hawd iyo Cadduun ee gobolada dhexe iyo qeyb yar oo ka mid ah hab nololeed beero-xoolo dhaqatada ee gobolka Shabeelada Hoose, halkaasoo Berkadihii iyo biyihii ka madheen laga soo bilaabo dhamaadkii bishii Febaraayo.



*Berkedo Qalalan/Gudhan. Deegaanka Sool, Gobolka Sanaag, FSNAU, 3aad, 2012*

Hayaanka xooluhu wuxuu si ballaaran ugu koobnaa meelihii xilliga *Jilaalka* ay sida caadiga ah u daaqi jireen isla markaana ku dhow goobaha ilaha biyaha sida webiyada iyo ceelasha. Waxaa la wariyey xoolihii hayaamay dib ugu soo noqdeen meelahoodii caadiga ahaa bilowgii bisha Maarso sida deegaanada Dooxada Nugaasha sare iyo qeybo ka mid ah Hawdka Burco iyo Soolka gobolka Bari, ka dib markii ay soo dhameysteen daaqii meelihii ay u hayaameen (Hawdka gobolka Sool, dhinaca Ethiopia ee deriska la ah Togdheer iyo qeybo kooban oo ah Deexda gobolka Bari ). Sidoo kale waxaa jirey xoolo ka soo hayaamay dhinaca Ethiopia (Xashin) iyo Hawdka Bari ee Hargeysa kuwaas oo tegay habnololeedka beero-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed si aay uga faa-ideystaan Balka iyo Cawska ka dib beero goosashadii.



*Dhalmada Ri'yaha oo Dhex-dhexaad ah. Buulo Burte, Gobolka Hiiraan, FSNAU, 3aad, 2012*


### Xaaladda dhaqanka Xoolaha, Wax-soo-saarkooda iyo Tarankooda

Dhaqanka noocyada xoolaha kala duwan ee gobolada dhexe, koonfur iyo qeybo ka mid gobolada waqooyi waxay yihiin heer dhexdhexaad ah ee lagu qiyaasay halbeegga 3 ee habka sawir ku qiimeynta dhaqnaanta xoolaha (HSDHX)[7] una dhexeeya 1-5. Hase ahaatee, Habnololeedyada helay roobabkii liitay ee xilligii *Deyrta* ee kal hore (ee kor ku xusan), xaaladda dhaqnaanta xooluhu way xumaatey taas oo lagu qiyaasay halbeega 2 ee (HSDHX). Taas oo si gaar ah u saameysay ri'yaha dhalay ama irmaan iyo maqashoodaba. Dhalidda ri'yaha iyo idaha ayaa iyana lagu tilmaamay heer Qiyaas dhexe ah guud ahaan waddanka oo dhan, in kastoo xaalado dhimasho xoolaad una dhexeysa 2-3 boqolkiiba iyo dhicin laga soo sheegay dooxada Nugaasha sare, oogada Sool ee Sanaag iyo hab nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee degmada Jamaame, taasoo lala xiriirinayo daaq xumo iyo cudurro ka yimid dullin calooleed. Dhalidda geela ee gobolada waqooyi iyo lo'da gobolada koonfureed ayaa la filayaa xilliga Hagaaga (Juulaay-Agoosto 2012). Dhalidda geela ee gobolada koonfureed ayaa iyana la filayaa xilliga *Deyrta* 2012/13. Hase ahaatee, dhicin aan badneyn ayaa dhici kara haddii roobka xilliga *Gu'ga* xumaadaan. Wax-soo-saarka caanaha xooluhu aad bay u hooseeysaan inta badan dalka, taasoo aay sababtey dhalidda xoolaha oo yareyd xilligii *Deyrta* iyo dhiiqidda xoolaha oo yaraatay xilliga *Jilaalka*.

### Ganacsiga Xoolaha iyo Qiimahooda

Suuqyada intooda badan, tixraaca qiimaha xoolaha waxey muujinayaan qiimo koror laga soo bilaabo bishii Diisamber 2011. Qiimaha ariga dhaqaalka ayaa kordhay gobolada dhexe (19 boqolkiiba), gobolada Waqooyi Galbeed (28 boqolkiiba), halka gobolada Waqooyi Bari aan muujin wax isbedel ah (koror ama hoos u dhac). Gobolada koonfureed ee Soomaaliya, qiimaha ariga dhaqaalka waxuu kordhay 14 boqolkiiba gobolada Shabeelooyinka, 7 boqolkiiba deegaanada caanka ku ah meseggo tacbashada. Gobolada Jubbooyinka qiimaha arigu isma bedelin ama in yar ayuu hoos u dhacay taasoo lala xiriirinayo dagaalada hubeysan ee ka socda gobolaka oo xanibay ganacsigii xoolaha. Is barbar dhigga qiima sanadeedka ee ariga dhaqaalka waxa uu muujinayaa koror inta badan suuqyada dalka, ayna ka mid yihiin gobolada Dhexe 19 boqolkiiba, Waqooyi Bari 8 boqolkiiba, Waqooyi Galbeed 29 boqolkiiba, Shabeelooyinka 57 boqolkiiba, Jubooyinka 51 boqolkiiba iyo Masaggo Tacbatada 108 boqolkiiba. Qiimma kororka sare ee gobolada koonfurta waxa inta badan lala xiriirinayaa dhaqanka/cayilka xoolaha oo wanaagsanaaday marka la bar bar dhigo sanadkii hore ee abaartu halagaysay.

**Jaantuska 4: Taxana Goboleedka Qiimaha Ri'yaha Daabaxa ah (SOSH/SLSH)**




7 Habka sawir ku qiimeynta dhaqnaanta xoola(HSDHX), waa hab loo adeegsado si loo qiimeeyodhaqnaanta(cayilka) xoolaha iyadoo la barbar dhigayo sawirro laga qaadey xoolaha Soomaalida oo naaxsanaantoodu kala duwantahay, laguna muujiyo 1( aad weyd u ah), neefka keena 5(aad u naaxsan), heerarka intaa u dhexeeyana tilmaamayaan cailnaanta kala gedisan ee xoolahaas. Waxaa qiyaastan la sameynayaa iyadoo aan la taaban xoolaha oogadooda meelkkast oo aay ku sugan yihiin sida(suuqa, xerada, wadada dhineceeda, duleedka reerka, dhulka daaqa iwm. Waxaa kaloo loo adeegsadaa si loola socdo isbedelka ku isla xoolihii ama xeyntii in muddo ah iyo is barbar dhigid xooloisku ceyn iyo tira ah oo meelo kala duwan jooga

Qiimaha lo'da dhaqaalka ah ee koonfurta Soomaaliya ayaa muujineyaa kala duwanan, inta badanna tilmaamaya hoos u dhac bisha Maarso marka la barbar dhigo bishii Diisember ee 2011 lana habraac ah qaab xilliyeedka. Si taa ka geddisan, qiimo koror ballaaran oo boqolkiiba 18 ah ayaa laga soo sheegay gobolka Baay, taas oo lala xiriirinayo suuq geyntooda oo sii hagaagtey iyo rabitaanka lo'da ee suuqyada Afgooye iyo Muqdisho oo kordhay. Suuq geynta soo hagaagtey iyo kororka rabitaanka lo'da laf ahaanteeda, ayaa qeyb ahaan sabab looga dhigayaa dib u furanka Dekadda Muqdisho. Qiimaha lo'da dhaqaalka ayaa si xajmi leh sare ugu kacday marka la bar bar dhigo heerarkii ugu hooseeyey watigii abaarta ee sanadkii hore (Shabeelooyinka - 69 boqolkiiba; Jubooyinka - 79 boqolkiiba; Deegaanada meseggo tacbatada - 174 boqolkiiba). Kororkan qiimaha lo'da waxaa inta badan sababey wanaagsanaanta dhaqanka xoolaha.

Sida lagu tibaaxay xogta rasmiga ah ee dekadaha Berbera iyo Boosaaso, qiyaastii 816,228 neef oo xoola ah ayaa laga dhoofiyey Soomaaliya intii u dhexeysay bishii Jannaayo iyo Maarso ee sanadkan 2012. 67 Boqolkii waxa laga dhoofiyey Berbera, inta hartay oo ah 33 boqolbiibana waxa laga dhoofiyey dekadda Boosaaso. Marka la barbar dhigo wakhtigan oo kale sanad ka hor, dhoofka xooluhu wuxuu muujinayaa koror dhan 34 boqolkiiba isku darka labada dakadood. Awoodda dekadda Ber-bera oo ballaaran, xoolaha dhoofka ah oo ka imaanayo Itoobiya oo kordhey iyo baahida dalabka xoolaha ayaa ka mid qodobada saacidey kororka dhoofka xoolaha.


## SUUQYADA IYO GANACSUGA

### Heerka Sarrifa


Muddadii saddexda bilood ee ugu horreysay 2012, Shilinka Soomaaliga waa uu ka sii xoogaysanayay doolarka Maraykanka ee suuqyada waddanka intood badan (Jaantuska 5). Haddii aynu soo qaadanno suuqyada Banaadir iyo Waqooyi-bari ka ganacsadaan, shilinka wuxuu hantiyay 11 iyo 17 boqolkiiba, waa siday isugu horeeyaane. Muddo sanad ah wuxuu shilinku hantiyay in u dhiganta 21-27 boqolkiiba ee suuqyada gobollada oo dhan. Kuwa ka ganacsada ayaa u sabab ah isbeddelkan kororka tirada doolarka ka imanaya bulshada samafalka iyo hawlaha dib u dhiska ay wadaan kuwa la halmaala horumarka.

Dhanka kele, shilinka Soomaaliland ayaa lumiyay boqolkiiba sideed isla muddadaa. Lumidda waxay xooggaysanaysaa in u dhiganta boqolkiiba 20, marka la barbar dhigo muddo hal sano ka hor. Tani waxa inta badan u sabab ah kordhinta isticmaalka SlSh ee dhaqaalaha, uguna wacan tahay isbeddelka siyaasadda dowladda8, iyo dhawaan isticmaalka SlSh laga dhigay mid sharci ah gobolka Togdheer9.

**Jaantuska 5: Heerka Sarrifka Lacagaha ee Billaha ee Gobollada lasoo soocay (Sosh iyo Slsh ka USD)**




**Jaantuska 6: Sicirka Badeecadda lasoo Dejiyo oo la barbardhigay Sarrifka lacagaha, Banaadir**




### Isbedelka Sicirka Badeecadha la soo Dejiyo

Saddex-bilood lihii koowaad ee 2012, cadadka firida (bariiska, burka iyo baastada) waxa kasoo degay dekadaha Boosaaso, Berbera iyo Muqdisha ayaa kordhay 94 boqolkiiba (276,408 MT) marka la barbar dhigo isla muddadaas ee sanadkii 2011. Waxaa middani inta badan u sabab ah firida soo galaysa dekadda Muqdisha oo aad u sarreysa (82,000MT-150% firidii soo degtay bilihii 1aad-3aad 2011) waxaana ugu wacan mashaariicda samafalka ee socda (lacagaynta cunnada, foojarka cunnada, iwm.). Balse, firida kasoo galaysa xuduudaha dalka (bilihii 1aad-2aad, 2012) ayaa xadidnayd, una dhiganta 965MT, halka firida kabaxday waddanka uu gaaray 5,344MT.


Isla muddadaasi, sicirka dhammaan badeecadda lagama maarmaanka ah ee lasoo dejiyo (Bariiska, sokorta, naaftada, saliidda iyo burka) ayaa si weyn hoos u dhacay deegaanada shilin Soomaaliga lagaga adeegto. Waxaa middani u horseeday arrimo deegaanka la xiriira sida: waxaa socda cuntada samafalka soo gaaraysa Muqdisho iyo gobollada kale; waxaa kordhay wixii kasoo degayay dekadda Muqdisho; iyo xoogaysiga shilinka Soomaaliga uu ka xoogaystay doolarka Maraykanka. Gaar ahaan, Banaadir, oo dekeddeeda ay u hawlgasha inteeda badan Koonfurta iyo Bartamaha, sicirka agabka lasoo dejiyo inteeda badan ayaa hoos u dhacay 3-14 boqolkiiba (Jaantuska 6). Heerka hoos u dhaca ee hal sano ka hor ayaa aad u xooggan gobollada qaar, gaar ahaan bariiska, sonkorta, saliidda cuntada iyo burka (19-30%); halka sicirka naaftadu hoos u dhacay 4-10 boqolkiiba. Waxaa lidkeeda ah, heerarka sicirka adduunka ee saddex-billaha koowad ee sanadka ayaa muujinaya sicir koror badeecadda inteeda badan (eeg FSNAU Market Data Update, Maarso 2012). Muddadii bilihii 1aad-3aad 2012, aagga shilin Soomaliga lagaga adeegto, sicirka bariiska wauxuu hoos u dhacay 17 boqolkiiba halka sicirka sonkorta iyo burka ay hoos u dhaceen 8 boqolkiiba. Balse, sicirka saliidda cuntada iyo naaftada ayaa muujinaya koror lixaad leh tan iyo hal sano ka hor (17% iyo 10%, oo siday isugu xigaan ah).

8 Dawladda ayaa dhaqan gelisay bixinta Canshuurta Dulsaarka Qiimaha (CDQ) 2011, oo lagu qaado lacagta waddanka
9 Ka hor Bishii 7aad 2011, SoSh ayaa ahaa lacagta lagaga addegto gobolka Togdheer

**Isbeddellada Diiwaaanka Qiimaynta libsadaha (DQI)**

Diiwaanka Qiimaynta libsadaha (DQI), oo ku salaysan qiimaynta Kharashka Ugu yar ee Adeegga (KhUA), ayaa hoos u sii dhacayay dalka intiisa badan bilihii 1aad-3aad 2012. Waxaa isbeddelkan lala xiriirinayaa hoos u dhaca baaxadda leh ee ku dhacay sicirka badeecadaha la xiriira KhUA, sida mesegada, burka, sonkorta, saliida cuntada iyo caanaha. Khaasatan, wuxuu diiwaankani aad hoos ugu dhacay Koonfurta (19%) iyo Waqooyi-bari (13%), laakiin wax yar (2%) ayuu hoos u dhacay gobollada SlSh lagaga adeegto (Jaantuska 7). Gobollada Bartamaha, sicirka mesegada iyo badeecada kale ooy ka midyihiin caanaha ayaa sare u qaaday 4 boqolkiiba DQI. Isbarbardhig sanadeedka ayaa muujinaya sicir-jab baaxad leh dhanka Koonfurta (25%) iyo meelaha kale ee SoSh looga adeegto (9-15%) iyo si degganaansho leh deegaanka lagaga adeegto SlSh.

**Jaantuska 7: Isbeddellada Diiwaaanka Qiimaynta Iibsadaha ee Billaha (DQI)**




*Inflation is slowly easing in SoSh regions but stable in SlSh Areas


## XAALADDA NAFAQADA

**Gobollada Koonfureed**

Falanqaynta baahsan ee xaaladda Nafaqada ee ay Samayeen FSNAU iyo xulafadeeda bishii 1aad ee 2012 ayaa muujisay xaalad **Aad u Ba'an** oo sii jiitantay oo ka jirta dhammaan gobollada koonfureed ee Soomaaliya. Ayadoo laga duulayo xaaladaha haatan taagan, is-beddelo xilliyeedyada soo jireenka (oo ah heer nafaqo oo walaac leh), cudurro dillaacay iyo helidda cunno ee xilligii *Jiilaalka* (bilaha 1aad ilaa 3aad), ayaa waxa la saadaaliyay in xaaladda nafaqo ay sii ahaan doonto mid **Aad u Ba'an** inta u dhexeysa bilaha 2aad-6aad ee 2012 (eeg: Xogta Taxanaha Farsamo, 9-ka bisha 3aad ee 2012). Xogta nafaqo ee laga helay goobaha caafimaad ee gobollada Jubbooyinka, Baay iyo Bakool inti u dhaxaysa bilihii 1aad iyo 3aad ee 2012, ayaa muujiyay tiro siyaado ah (15% iyo wax ka badan) oo caruurta la keenay goobahaasi ayaa si ba'an u nafaqo daran (Jaantuska 8aad). Hase yeeshee, xogta nafaqo ee dadka reer-magaalka ee laga helay goobaha caafimaadka Shabeellooyinka iyo Banaadir isla xilligaasi ayaa muujinaysa xaalad ka yara wanaagsan kuwa kale ayadoo 10-15 boqolkiiba caruurta la keeno goobahaasi ay si daran u nafaqo daran yihiin.

Sida lagu sheegay warbixinta caafimaad ee Hay'adda Caafimaadka Adduunka (Xogta Caafimaadka Deg-degga Soomaaliya, 20-30 Maarso), cudurka xummadda/mallaariyada (944 oo xaaladood oo la xaqiijiyay) ayaa ah sababta koowaad ee faafsanaanta cudurrada ayadoo baahsanaan korortay laga soo sheegay gobollada Jubbada Dhexe, Gedo, Shabeellada Hoose iyo Banaadir. Shuban biyood aad u ba'an (AWD) iyo/ama xaalado daacuun oo la tuhmayo (t=589) ayaa sidoo kale laga soo sheegay gobollada Shabeellada Dhexe, Jubbada Dhexe iyo Gedo. Tirada dadka uu ku dhacay shuban biyoodka (AWD) dhamaan Soomaaliya ayaa la filayaa inay kororto inta u dhaxaysa bilaha 4aad iyo 6aad (*Gu*-ga) ayadoo lagu salaynayo taxanaha soo jireenka. Cunno helidda dadka beero-xoolo dhaqatada ku tiirsan xoolaha ayaa weli si ah caqabad ka dib kaydka cunto ee dadka saboolka ah oo gabaabsi noqday xilligii *Jiilaalka*; roobabka *Gu'ga* oo ay u dhow inay ka hoos maraan heerarka caadiga ah (marka loo eego saadaasha haatan la sameeyay); iyo xannibaadaha gurmadka bani'aadminimo ee ka dhalatay mamnuucidda hay'adaha samafalka ee gobollada koonfureed. Ayadoo laga duulayo xogtan, ayaa xaaladda nafaqada ee wakhtigan xaadirka ah ay tahay mid u muuqata inay noqonaysa mid **Aad u Ba'an**, oo sii jiitamaysay tan iyo bishii 1aad ee 2012. Sahamo nafaqo oo laga dhex samaynayo dadka reer-magaalka iyo barakacayaasha ayaa la qorshaynayaa in laga sameeyo Muqdisho dhamaadka bisha 4aad. Natiijooyinka sahamadaas ayaa lagu soo bandhigi doonaa Warsidaha Nafaqada ee bilaha 4aad/5aad.

**Jaantuska 8: Taxanaha Xogta Goobaha Caafimaadka ee Nafaqo Darada Habnololeedka Xoolo Dhaqatada Jubooyinka, (1aad-3aad 2012)**




**Gobollada Dhexe iyo Kuwa Waqooyi**

Xaaladaha nafaqo ayaa la filayaa inay noqdaan kuwo ***Daran*** inta badan hab-nololeedyada xoolo-dhaqatada iyo beero-xoolo dhaqatada gobollada dhexe iyo kuwa waqooyiga Soomaaliya, taasoo waafaqsan sida ay arrimuhu ahaayeen xilliyadii la soo dhaafay. Cabidda caanaha ee dadkani ayaa hooseeyey sababta koowaad ee lala xiriirinayana heerkan nafaqo ayadoo wax-soo-saarka caanaha uu hoos u dhacay taas oo la xiriirta wax-soo-saarka yaraaday ee xilliga ba'an ee *Jiilaalka*. Cudurro ka dillaacay qaar ka mid ah deegaanada ayaa sidoo kale u dhiganta sababo saamayn leh. Xogta caafimaad ee hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) ayaa sheegtay tuhun ah in faafka cudurka jadeecada (t=140) ee gobollada Waqooy-galbeed uu kordhay. Barnaamijka tallaalka ee Maalmaha Caafimaadka Caruurta (19-23 Febraayo 2012) ee ay faafisay Wasaaradda Caafimaadka ee Soomaalilaan ayaa tilmaantay in tallaalka uu si aad ah u gaaray caruurta sida cudurka dabaysha (91%), jadeecada (88%), iyo gowracatada/xiiqdheerta/teetanada (DPT) (81%). Wasaaradda ayaa sidoo kale sheegtay heer gooryaan-sifeyn (de-worming) gaaraya 84 boqolkiiba. In kastoo heerarkan ay ka hooseeyaan kuwa hal beegga caalamiga (Sphere 2011) ayaa haddana waxay muujinayaan heer fursad helid daryeel caafimaad iska wanaagsan, taasoo ay u dhowdahay inay horumariso xaaladaha nafaqo. Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo xulufadeeda ayaa isha ku sii hayn doona wixii is-beddelo ah ee ka dhaca dhammaan dalka, ayadoo weliba taageeraysa hawlaha ka hor-tagga shuban biyoodka ba'an (AWD).

**Jadwalka Sahamada Nafaqo ee Bilaha 4aad-7aad 2012**


FSNAU iyo hayda'aha la shaqeeya waxay haatan (bisha 4aad 2012) ka qabanayaan sahamo nafaqo dadka reer magaalka iyo barakacayaasha ku dhaqan magaalada Muqdisho. Natiijooyinka ka soo baxa sahamadani ayaa lagu faafin doonaa wargayska Nafaqada ee bilaha 4aad-5aad ee 2012 oo la jadwaliyay inuu soo bixi horraanta bisha 5aad. Sahamo nafaqo ayaa sidoo kale laga samayn doonaa dalka oo dhan bilaha 5aad-7aad ee 2012.

# FALANQAYNTA BAAHSAN EE SUGNAANTA CUNNADA

## Magaalooyinka


Xilligii *Deyrta* 2011/12, sugnaanta cunnada ee dadka ku nool magaalooyinka ayaa soo yara roonaatay si la taaban karo marka loo eego sidii ay ahayd xilligii hore taasoo ay ugu wacan tahay hoos u dhac aad ah oo ku yimid sicirka cunnada iyo maciishadda dadka saboolka ah. Hase yeeshee, 550,000 oo qof ama in ku dhow shan-meelood meel oo dadka ku dhaqan magaalooyinka, ayaa ah kuwo weli ku jira xaaladaha cunno xummada **Ba'an (Crisis)** iyo midda **Degdegga** (**Emergnecy**) ah. Inta u dhaxaysay bilihii 1aad iyo 3aad 2012 qiimaha cunnada ayaa tusayay hoos u dhac hor leh inta badan waddanka, taasoo laga arkay hoos u dhaca Karash Nololmaalmeedka Ugu Yar (KNUY) (Jaantuska 9aad). Kharashka **KNUY** gobollada koonfurta ayaa si aad ah hoos ugu dhacay, gaar ahaan Shabeellada Hoose (32%). Hoos u dhaca kharashka **KNUY** ee gobollada Waqooyiga ayaa u dhigmay 10-12 boqolkiiba, halka kharashku uusan waxba iska beddelin magaalooyinka ku yaalla gobollada Dhexe. Marka soo ahaan loo eego, kharashka KNUY ee bishii 3aad ayaa ahaa sidan: Muqdisho SoSh 2,07,925; Gobollada koonfurta SoSh 2144,101; Gobollada Dhexe SoSh 3,469,542; gobollada Waqooyiga ee istimcmaala Shilin Soomaaliga SoSh 4,140,154; gobollada Waqooyiga ee istimcmaala Shilinka Soomaalilaan SoSh 882,182. Isbar-bar-dhig sanadeedka ayaa muujinaya hoos u dhac kharashka KNUY dhamaan dalka (Koonfurtta-26%, gobollada Dhexe-11% iyo Waqooyiga-15%), taasoo ay sababeeen hoos u dhaca qiimaha quutal-daruuriga. Hoos u dhaca qiimaha firilayda/badarka ayaa saamayn weyn leh, maadaama firileydu tahay qaybta ugu ballaaran (30-40%) ee quutal-daruuriga ugu yare e lagu noolaan karo (eeg Qaybta Suuqyada) Heerarka mushaar hawl-maalmeedyada dhammaan dalka ayaa ahaa kuwo kala duwan. Mushaarada hawlmaalmeedyada aan xirfadda ku dhisnayn ayaa kuwo aan is beddelin amaba in yar kordhay (6-9%) inta badan gobollada koonfurta, marka laga reebo Baay, Gedo, Hiiraan halkaasoo hoos u dhac ay sababeen dagaallo halkaasi ka socda laga arkay. Mushaar hawlmaalmeedyada ugu sarreeya ayaa laga soo sheegay Banaadir (SoSh103,000) iyo Gedo (SoSh155,000) ayadoo hawlaha ganacsi iyo isdhaafsiga ka jira xuduudaha dalka ay ka sarreeyaan meelaha kale, halka mushaar maalmeedka ugu hooseeya uu ka jiro Baay (SoS60,000) iyo Bakool (SoSh62,500). Mushaar-maalmeedyada gobollada Dhexe iyo kuwa Waqooyiga isticmaala SoSh ayaan is beddelin in kastoo kala duwanaanshiyo ay ka jirto magaalooyinka Waqooyiga. Waqooyiga isticmaala SlSh ayaa mushaar-maalmeedyadu hoos u dhaceen Awdal (SlSh 32,500), halka waxoogaa koror ah lagu arkay Togdheer iyo Waqooyi Galbeed SlS35,000 iyo SlSh40,000, waa siday isugu xigaan.

**Jaantuska 9: Karash Nololmaalmeedka Ugu Yar ee Heer Gobol (3aad, 2012)**




Ayadoo qiimaha firileydu uu weli hoos u sii socdo, awoodda wax iibsi ee reer magaalka saboolka ah ee dhammaan dalka ayaa soo roonaaday/hagaagay bilihii 1aad illaa 3aad, taasoo la arkay xaddiga is-weydaarsiga badeecooyinka ee u dhexeeya firiayda iyo mushaar hawl-maalmeedka (Jaanstuska 10aad). Gaar ahaan gobollada koonfurta, kororka xaddiga iswaydaarsiga badeecadaha ayaa ah sidan: Banaadir (17%), Gedo (22%), Shabeellooyinka (22%), Jubbooyinka (80%), Bakool (100%), Baay (150%) iyo Hiiraan (9%). Sidoo kale, xaddiga badeeco is-weydaaris (shaqo/haruurka cas) ee gobollada Dhexe ayaa kordhay 20%. Xaddiga badeeco isweydaarsi (shaqo/bariis) ayaa kordhay 33 boqolkiiba ayna ugu wacan yihiin hoos u dhac ku yimi qiimaha bariiska suuqyada maxalliga oo ay hoos u dhigeen gargaarka bani'aadminimo iyo firilayda ka imanaysa gobolllada koonfurta oo kordhay. Xaddiga badeeco-iswaydaarsi ee gobollada Waqooyiga ayaa sidoo kale kordhay amaba halkoodii aanay iska beddelin. Gaar ahaan, xaddiga badeeco iswaydaarsi (shaqo/haruurka cas) ee gobollada Wagooyiga Bari ayaa kordhay sida Nugaal (75%) , halka aysan waxba iska baddalin gobolka Bari. Dhanka Wagooyiga Galbeed, koror ayaa laga soo sheega gobollada Sanaag, Togdheer W.Galbeed (16-27%) iyo Awdal (60%). Hase yeeshee, xaddiga badeeco iswaydaarsi ee gobolka Sool ayaa hoos u dhacay 20 boqolkiiba taasoo ay ugu wacan tahay dagaallada ka socda dhulkaas (eeg qaybta Colaadaha Sokeeye). Isdhaafsiga badeeco (shaqo/bariis) ee gobollada Waqooyiga ayaa muujinaya koror celceliskiisu uu yahay 20 boqolkiiba (Waqooyiga isticmaala SoSh) iyo 33 boqolkiiba (Waqooyiga isticmaala SlSh).

**Jaantuska 10: Taxanaha Awoodda Is-weydaarsiga Badarka iyo Heerka Maalin Goosiga ee Heer Gobol (Isbarbardhiga bilaha 12aad 201 iyo 3aad 2012)**




In kastoo xaaladaha sugnaanta cunno ay wanaagsanaanayeen ilaa *Deyrtii* 2011/12, roobabka *Gu'ga* 2012 oo la saadaaliyay inay ka hooseeyaan heerarka caadiga inta badan dalka ayaa saamayn ku yeelan kara wax-soo-saarka cunnada ee dalka, taasoo laga arki doono isbeddelada qiimaha cunnada iyo qiimaha maciishadda. Sugnaanta cunno ee magaalooyinka ayaa waxa saamayn ku yeelan doona dagaallada sokeeye kuwasoo haatan ah kuwo aan la qiyaasi karin oo goos-goos ah. Hase yeeshee, sugaanta cunno ee Muqdisho ayaa la filaya inay sii hagaagto maadaama ay socdaan hawlo wax ku ool ah dhanka horumarinta dhaqaalaha, dayactirrada agabka horumarineed iyo jiritaanka gargaarka bani'aadminimo. FSNAU oo kaashanaysa WFP ayaa haatan waxay Muqdisho ka wadda sahan la xiriira heerka sugnaanta cunno ee dadwaynaha iyo barakacayaasha ku dhaqan Muqdisho. Natiijooyiinka ka soo baxa sahamadan ayaa lagu soo bandhigi doonaa Warsidaha Nafaqo ee bilaha 4aad-5aad ee 2012 kaasoo la jadwaliyay inuu soo baxo horraanta bisha May.

## REER MIYIGA


### *Gobolada Koonfureed*

Si wax-ku-oolnima leh ayay u kobocday xaaladda sugnaanta cuntada ee deegaanada reer miyiga ee gobolada koonfureed ka dib xilligii *Deyrta* 2011 taas oo loo aaneynayo ama sababeynayo saameyntii xilligii wanaagsanaa ee *Deyrta* iyo korodhka wax qabadka gargaarka bani'aadaminimo. Hase yeeshee, qiyaas ahaan 900,000 qof ayaa wali ku jira ama sugan xaalad cunto xumi baahsan oo ah heer daran iyo gurmad. Sidii hore loo saadaaliyey, xilligii *Jiilaalku* waxa uu ahaa mid ladifan ama sahlan. Wax lagu xusuusan karaa ladifnaanta *Jilaalka*, hoos u dhaca qiimaha badarka, koboca maalin goosiga, wax-soo-saarka dalagga ka dib *Deyrta*, dhalmada xoolaha siiba ri'yaha, kor u kaca qiimaha xoolaha, hufnaanta guur-guurka xoolaha, korodhka ka kaluumeysiga *Dhesheegyada* ee Jubooyinka. Qoysaska danyarta ahi waxay heystaan keyd badar oo ah kii xilliggi *Deyrta* la goostay kaas oo la isticmaali karo ama quudan doono illaa bilaha 6aad-7aad 2012 ee deegaanada ku caanka ah mesegada ee Baay, deegaanada diilka/jiinka webiga ee Shabeelaha Hoose iyo qaybo ka tirsan hab nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee Shabeelooyinka (Wanlaweyn iyo Balcad). Keydka badarka ee xilligii *Deyrta* ee deegaanada diilka/ jiinka webiga ee Hiiraan iyo Shabeelaha Dhexe, hab-nololeedka xoolo-beeraleyda Saakow (Jubada dhexe), xoolo-beeraleyda Jowhar (Shabeelaha Dhexe) iyo Baardheere (Gedo) waxa uu ku filan yahay illaa dhammaadka bisha 5aad 2012. Wax-soo-saarkii wanaagsanaa ee la goostay bishii 3aad 2012 waxay kobcisay keydka galleyda ee degmooyinka Jammaame (Jubada Hoose) taas oo ku fillaan doonta illaa dhammaadka bisha 7aad iyo Jilib (Jubada Dhexe) taas oo ku filan illaa badhtamaha bisha 6aad. Hayeeshee, keydka badarka ee deegaanada kale waa gabaabsi ama dhammaad.



*Kelli la Dayactirey. Tuulada Kallundi, Jowhar, Shabeellaha Dhexe, FSNAU, 3aad, 2012*

**Jaantuska 11: Taxanaha Awoodda Is-weydaarsiga Badarka iyo Ri'da daabaxa ah ee Heer Gobol**




Bilihii 1aad-3aad 2012, awoodda is-weydaarsiga badarka iyo heerka maalin goosiga (ToT) wuu kobcay dhammaan gobolada koonfureed taas oo ay sababtay hoos u dhaca qiimaha badarka iyo korodhka maalin goosiga hawlaha beeraha oo kordhay awgeed. Tusaale ahaan, marka la is barbar dhigo bilaha 12aad 2011 iyo 3aad 2012, awoodda is-weydaarsigu waa kordhay gobolada Jubooyinka (9kg/maalin goos - 80%), gobolada mesegada ku caanka ah (19kg/maali goos - 46%) iyo Shabeelooyinka (11kg/maalin goos - 22%). Guud ahaan, awoodda wax-iibsiga ama isweydaarsiga waxa uu muujinayaa koboc aad u wanaagsan marka la barbar dhigo heerarka 4-6kg/maalin gooskiiba ee kal hore oo la abaareysnaa.

Bilihii 1aad-3aad 2012,qiimaha ri'yaha daabaxa ah waa kordhay gobolada Shabeelooyinka iyo deegaanada mesegada caanka ku ah sababta oo ah xoolaha oo mac/dhaqaaleysan ama jidh ahaan wanaagsan iyo dadka ka ganacsada xoolaha oo xoolo badan u iibsanaya bisha barakeysan ee soo socota awgeed (dhugo ama eeg qaybta xoolaha). Qiimaha ri'yaha daabaxa ah si aad ah ayuu uga sareeyaa heerarkii sannad ka hor ama kal hore (Jubboyinka iyo Shabeelooyinka: 30-60%, Hiiraan 90%, iyo in ka badan 100% dhammaan gobolada kale ee koonfurta). Qiimaha lo'da daabaxa ah waxay muujinayaan korodh la mid ah ka ri'yaha dhammaan gobolada koonfurta. Saddex biloodka hore ee 20122, qiimaha lo'da daabaxa ah waxa isbedel ah ma muujin Shabeelooyinka iyo deegaanada mesegada caanka ku ah, halka ay Jubooyinku ay muujiyeen hoos u dhac qiime khalkhal ama hakad ku yimid fursaddii lagu tegi lahaa suuqa xoolaha Gaarisa (Kiiniya) dagaalka ka soconaya deegaanadaa laga soo bilaabo bishii 3aad 2011 awgeed. Is-barbar-dhiga bilaha 12aad 2011 iyo 3aad 2012, awood is-weydaarsiga badarka iyo ri'yaha waa kordhay gobolada Shabeelooyinka (24%), Jubooyinka (35%) iyo deegaanada caanka ku ah mesegada (85%) (Jaantuska 11).

### *Gobollada Bartamaha*

*Deyrtii* 2011/12 ka dib, xaaladda sugnaanta cuntada ayaa muujisay kasoo rayn dhammaan habnololeedyada, inta badanna ugu wacantahay waxtarka horumarka leh xilligii *Deyrta*. Balse, 125,000 oo ruux oo ku nool miyiga ayaa weli ku sugan **dhibaato** iyo **Gurmad Deg-deg** ah. Hab-nololeedyada Digir Tacbatada iyo Cadduunka intiisa badan ayaa weli ku sugan Dhibaato, halka Xeebaha Deexda, oo u dhibtooday xoolo badan oo kaga dhammaaday xilliyadii abaarha, ay weli ku jiraan xalad **Gurmad Degdeg** ah. Muddadii lagu jiray xilligii *Jiilaalka*, Habnololeedyada xoolo-dhaqatada ee Hawdka iyo Cadduunka ayay la soo deristay biyo la'aan ba'an kuna khasbay inay adeegsadaan biyo dhaamiska baabuurta. qaar ka mid ah xoolo dhaqatada waxay ku dhowaadeen ceelasha biyaha. Daaqsinkii ayaa aad u yaraaday helitaankiisii iyo weliba tayadiisii balse ku filan inta roobabka *Gu'ga* uu sidii caadiga ahayd uga billaabanayaan. Balse, roobabkani ayaa lagu warbixiyay inay ka da'een meelo ka mid ah habnololeedyada Xeebaha Deexda iyo Digir Tacbada tobanlihii 2aad ee Bishii 4aad. Inkastoo xaaladda daaqsinka ay sii xumaatay, naaxsanaanta xoolaha ayaa weli caadi ah dhammaan habnololeedyada. Balse, wax-soo-saarka caanaha ayaa hoos u dhacay maadaama tayadii daaqa hadda jira uu sii liidanayo iyo heerka dhalmada geela oo hooseeysay *Deyrtii*.

Keydka firida ee qoysaska saboolka ee Digir Tacbatda ayaa dhammaaday muddadii *Jilaalka*; waxay hadda ka helaan cuntadooda ka iibsi suuqa (caddaan ama deyn) iyo sadaqo. Bilihii 1aad-3aad 2012, sicirka ariga dhaqaalka ah ayaa kordhay 14-20 boqolkiiba dhammaan habnololeedyada. Waxaa middan ugu wacan baahida sii kordhaysa u sii urursashada xoolaha nool ee ganacsatada xilliga Ramadaanta (bilaha 7aad-8aad). Sicirka ariga ee kacay iyo sicirka bariiska ee dhacay ayaa sababay in si wax ku ool ah u wanaagsanaado Isweydaarsiga Badeecadaha (IB) ee ariga dhaqaalka iyo bariiska (Jaantuska 12). Isbeddelka badeecadaha ee bariiska iyo ariga ayaa si wax-ku-ool ah u kordhay (64-74%) inta badan suuqyada Bishii 3aad 2012 marka la barbardhigo Bishii 12aad 2011 haddana wuxuu u dhigmaa 60-75kg/ neefkii ugu wacan tahay hoos u dhaca sicirka/qiimaha bariiska (21%) iyo kororka sicirka ariga dhaqaalka (20%). Waxaa intaa dheer, dhulka ay nabadgelyadu adagtahay sida (Ceeldheer and Dhuusamareeb) isweydaarsiga beddelka badeecadaha ayaa si dhexdhexaad ah u kordhay (20%) hadana u taagan 39-59kg/neefkiiba. Waxaa la mid ah, koror weyn oo isbarbardhig sanadeed ah (in ku dhow 60%), oo sababay sicirka bariiska ee dhacay iyo sicirka xoolaha ee kordhay. Isweydaarsiga badeecadaha ee mesegada guduudan iyo ariga ayaa iyana kordhay boqolkiiba 9 (76kg/neefkiiba) hawdka/Cadduunka iyo boqolkiiba 29 (103kg/neefkiiba) Digir Tacbatada iyo Xeebaha Deexda.




*Xoolo Dhoof ahaan loo Rarayo. Dusamareeb, Gobolka Galgadud, FSNAU, 3aad, 2012*

## *Gobollada woqooyi*

Xilligii *Deyrta* 2011/12 ka dib, 135,000 oo qof ayaa loo aqoonsaday inay ku suggan yihiin xaalad sugnaan la'aanta cuntada ee waqtiga gaaban, oo kala ah ***sugnaan la'aanta cuntada ee ba'an(Crisis) iyo tan gurmadka bani'aaddanimo (Emeregency)*** taasoo 46 boqolkiiba ka hooseysa tii xiligii *Gu'gii* 2011. Xilligii *Jilaalka* dhulka daaqsinta iyo ilaha biyuhuba wey sii dhammaadeen inta badan hab nololeedyada. Meelaha waxyeelada badani gaartey waxey yihiin, Nugaasha sare, qeybo ka mid ah oogada Sool, Goliska bari ee Sanaag iyo dhul xeebeedka Awdal (Guban), meelahaas oo roobabkii *Deyrtu* 2011/2012 ay ka hooseeyeen heerka caadiga ah. Taasina waxey sababtey biyo dhaan hore u bilowdey( ilaa Febaraayo 2012) sida looga soo warbixiyey hab nololeedyadan. Dhalidda ri'yaha iyo idaha ayaa iyana lagu tilmaamay heer Qiyaas dhexe ah inta badan habnololeedyadan xilligii *Jilaalka*. In kastoo xaaladda dhimasho xoolaad la soo sheegay una dhexeyso 2-3 boqolkiiba iyo dhicin laga soo sheegay dooxada Nugaasha sare, oogada Sool ee Sanaag taasoo aay sababtey daaqii oo xaalufay. Dhibka ugu badaan waxuu gaarey ri'yaha irmaan iyo maqashooda. Dhaqnaanta xoolaha ee dhulka roob yarawga ah ee aan kor xusnay waxey gaartey heer liita kana hooseeya heerka dhexdhexaadka, laguna muujiyo heerka halbeegga 2 ee heerka sawir ku muujinta dhaqnaanta xoolaha (HSDHX), taasoo ay sababtey dhulkii daaqkii oo xaalufay. Dhiiqidda xooluhu aad bay u hooseysaa waqtigan, taasoo ay sababtey dhalidda xoolaha oo yareyd xilligii *Deyrtii* 2011/12 iyo dhiiqidda xoolaha oo yaraatay xilliga *Jilaalka* daaq xumo awgeed. Si kastaba ha ahaatee dhalidda Geela iyo helidda caanaha oo korodhay ayaa sugayaa xilliga Xagaaga (7aad-9aad), gaar ahaan Hawd, Caddun,Golis iyo Dooxada Karkaar/Dharoor. Haddii da'idda roobka *Gu'ga* 2012 xumaato waxay u badan tahay in dhicinta xooluhu iney yaraan doonto.

**Figure 12: Taxanaha Awoodda Is-weydaarsiga Badarka iyo Ri'da daabaxa ah ee Heer Gobol**





Bisha Maarso ee sanadkan, qiimaha ariga dhaqaalka ah ayaa kordhay 28 boqolkiiba gobolada Waqooyi Galbeed, halka aani isbedelin gobollada Waqooyi Bari marka la barbar dhigo bishii 12aad 2011. Halka is barbar dhigidda qiima sanadeedka uu muujiyey koror/horumar muhiim ah, kaa soo kordhay 29 boqolkiiba gobolada Waqooyi Bari, halka koror aan saa muhiim u aheyn laguna qiyaasey 8 boqolkiiba lagu sheegay gobolada Waqooyi Bari. Kororka qiimaha xoolaha ee gobolada Waqooyi Galbeed waxaa sabab u ah, dalabka xoolaha nool oo ku badan suuqyada Waqooyi Galbeed taasoo la xiriirta dhoofka xoola badan ee Dekadda Berbera. Awooda wax iibsiga dadka ayaa hagaagtay taa soo ka timid qiimaha ariga dhaqaalka ah oo kordhay iyo qiimaha bariiska oo hoos u dhacay *Jilaalkan*. Tusaale ahaan, Saamiga isku bedelashada qiimaha ariga dhaqaalka ah iyo bariiska ayaa kordhey 80 boqolkiiba gobolada Waqooyi Galbeed iyo Togdheer, kaa soo u dhigma 80 kiilo/neefkiiba bishii Maarso 2012, oo ah in ku dhaw qiyaasta firileyda ah oo aay u baahan yihiin qoys reer guuraa ahi hal bil. Halka saamiga isku bedelashada ariga dhaqaalka ah iyo bariiska ee meelaha kale korodhay 20 boqolkiiba, taas oo u dhiganta celcelis ahaan 54kiilo/ neefkiiba.



*Biyo Dhaamis. Qardho, Gobolka Bari, FSNAU, 3aad, 2012*

# SOMALIA: LIVELIHOOD ZONES

FSNAU
Information for Better Livelihoods




**Daabacaadihii u dambeeyay iyo kuwa soo socda iyo wixii la baahiyay**

*FSNAU March - April Nutrition Update (Forthcoming), May 2012*
*FSNAU March Climate Data Update, April 2012*
*FSNAU March Market Data Update, April 2012*
*FSNAU Technical Series Report Post Deyr 2011/12 Nutrition Situation, March 2012*
*FSNAU Technical Series Report, Post Deyr 2011/12 Analysis, March 2012*

*OGOW: Daabacaadaha iyo wixii la baahiyayba ee sare ku xusan waxaad ka heleysaa FSNAU website: www.fsnau.org*


Technical and Managerial Support

Funding Agencies